




# ISTIRAAJIJIGA NADIIF AHAANTA HAWADA DEKEDAHAD WOQOOYI GALBEED

2020

Istiraatijiga Nadiif Ahaanta Hawada Dekedaha Northwest Ports (Istiraatijiga) waa dadaal iskaashi oo u dhixeyya Dekedda Seattle, Dekedda Tacoma, Isbahaysiga Dekedaha Woqooyi-Galbeed, iyo Maamulka Dekedda Vancouver Fraser ee British Columbia (Dekedaha Woqooyi-Galbeed) oo dhidbaya aragtii lagu joojinayo kolba in qaaca ka soo baxa hawla la xidhiidha dekedda badda dhammaan hawada Mareennada Biyaha Xadka Ku Siidaynta Georgia Basin-Puget Sound kama dambayn 2050.

Afarta dekedood ayaa u dhidbaday xeeladdan iyaga oo u maray wada hadallo ballaadhan oo waxayna ka turjumaysaa tallaabo muhiim ah oo lagu derdergalinayo iskaashiga ka dhixeyya dhammaan dekeda, wax soosaarka, dawladda, iyo bulshada iyada oo loo socdo xagga aragatidan wadajirka ah. Istiraatijiyada ay



Khariiddada hawada ku hareersan iyo xuduudaha xisaabinta naqaska ayaa ku jira Istiraatajiyada

# Horumarinta Cadaaladda Bey'adeed

Iyada oo loo maro qaabdhismedka xeeladeed ee Istaraatijiyyada, dekeda Northwest ayaa og yihiin kaalintooda gacan ka geysashada xaddidka adduunka sii kululalaanaya iyo in si joogto ah loo yareeyo walxaha qurubyada naaftada iyo naqasyada kale ee hawada ku baxa ayaa xaasaasi u ah caafimaadka bulshooyinka gagagaarka deggan, gaar ahaan meelaha ay ka jiraan kala duwanaanshaha caafimaad bey'adeedku.

Hawla la xidhiidha deked badeedka ayaa ku biiriya ku badhxanka wasakheeyaha hawada hawada agagaaraha. Bulshooyinka dakhligoodu-hooseeyo iyo bulshooyinka midabka duwan ayay badiyaa deggenaanshahoodu ku yaal meelo u dhow ilaha wasakhaynta hawada, iyada taasi sare u qaaddo muhiimadda ay leedahay in la wanaajijo tayada hawada si loo hormariyo sinnaanta bulshada iyo cadaaladda bey'adeed ee bulshooyinkeenna.



## Wadashaqaynta ay Natijjooyinku-Wadaan

Iyada oo markii ugu horeysay la ansixiyay sannadkii 2008, Istaraatijiyyada ayaa ahayd tii ugu horeysay ee noocas ah ee bulshada Dekedda ka soo baxda oo waxaana laga gaadhay natijjooyin aad u badan intii tobankii sano ee la soo dhaafay ahayd. Cusboonaysiintii ugu horreysay ee Istaraatijiyyada gudihii 2013 waxay dejisay bartilmaameedyo lagu yareynayo walxaha qurubyada naaftada iyo siidaynta naqaska hoyga cagaaran halkii metrik ton ee xamuulka illaa boqollay 80 iyo boqollay 15, siday u kala horreeyaan, marka loo eego heerarkii 2005. Dekedaha Waqooyi-Galbeed ayaa ku guulaystay labada bartilmaameedba afar sano in ka horraysa Xisaabintii Ku Siidayn Badeedka Naqaska ee Puget Sound ee 2016. Hoos u dhigyadan waxaa loo aanayn karaa isbeddellada ku yimid xeerarka caalami, qaran, iyo kuwa gobollada, ficillada kuwa wax soo ssara, iyo siyaasadaha dekadaha iyo barnaamijyada in la dedejiyo in laga baxo qalabka duugga ah iyo istcimaalka shidaallo ka sii sii nadiif badan.


Horumarka lagu gaadhayo himilooyinkan ayaa sideedii u socota in laga warbixiyo oo lagu daabaco Warbixinnda Hirgalinta Sannadeed iyo ku kuwa siidaynta naqaska hoy-caagaarkan ka yimaad ee waax kasta ee la cabbiro shantii sano ee kasta.



## Ficil Ka Qaadka

Dekedaha Waqooyi Galbeed ayaa midkii kastaa sii deyn doontaa qorsheyaal si gaar ah dekeda si ay ugu hirgeliyaan aragtida Istaraatijiyyada 2020 iyo ujeeddooyinka hawl galladooda oo waxayna ku sii wadi doonaan inay sannad kasta ka warbixiyaan horumarka.

Qorshayaasha hirgalinta kolba dekeda u gaarka ah ay karti u siinaya dekaduhu inay ogaadaan, kala mudnaanta siyaan, oo ay ugu toosiyan kheyraadka ficillada hab xeeladaysan oo la halmaala meheraddooda iyo duruufaha siyaasadeed, iyo gobollada ay ka hawl galaan.



## Wixii macluumaad dheeraad ah

**Northwest Seaport Alliance** (Isbahaysiga  
Dekedda Waqooyi Galbeed)  
[www.bit.ly/NWSAstrategy](http://www.bit.ly/NWSAstrategy)  
**Dekedda Port of Seattle**  
[www.bit.ly/seattlestrategy](http://www.bit.ly/seattlestrategy)

**Dekedda Port of Tacoma**  
[www.bit.ly/tacomastrategy](http://www.bit.ly/tacomastrategy)  
  
**Maamulka Vancouver Fraser Port**  
[www.bit.ly/vancouverstrategy](http://www.bit.ly/vancouverstrategy)